


# Isbitaalka Angereds

# QAYBTA BAADHITAANKA GUDAHA XUBNAHA JIRKA

Macluumaad ku saabsan baadhitaankaaga
***Endoskopi-ga hortii***

## *Ku soo dhawoow isbitaalka Angered!*

Waxaa aad buugan yar ka baran doontaa waxyaabaha ay tahay in aad ka fikirto iyo sidii aad ugu diyaar garoobi laheyd baadhitaanka lagugu sameyn doono ee lagu magcaabo Endoskopi.

Ka fiiri waqada yeedhitaanka nooca baadhitaanka ee lagugu yeedhey. Ka akhri buuggan yar qaybta adiga kaa khuseeysa.

Sidoo kale akhri cutubka *"Si taxadar leh ugu fiirso dawooyinka aad qaadato"* – cutubkani waxaa uu khuseeysaa qof walba.

**SOMALISKA**

# TUSMADA


| | |
|---|---|
| Si taxadar leh ugu fiirso dawooyinkaaga | 2–3 |
| Gastroskopi | 5 |
| Sigmoideoskopi | 6 |
| Koloskopi | 8 |
| PLENVU | 10 |
| VISTAPREP AMA LAXABON | 13 |
| Nagala soo xidhiidh | 16 |


# SI TAXDAR LEH UGA FIIRSO DAWOOYIKA AAD QAADATO!

## MA QAADATAA QAAR KA MID AH DAWOOYINKA HOOS KU XUSAN?:

*7 maalmood ka hor*

- **Waran, Apekumarol, ama Warfarin?** Waa in aad markaa ugu danbeyn 7 maalmood ka hor maalinta baadhitaanka aad la xidhiidho qaabilaadda AK/ dhakhtarka daawayntaada qaabilsan si lagaga joojiyo dawooyinka aad qaadato. Waxaa sidoo kale lagaa qaadi doonaa dhiig tijaabo oo lagu magacaabo (PK prov) maalinta ka horeysa maalinta baadhitaanka, waxaa dhiigga tijaabada ah lagaaga qaadi doonaa xarunta dhexe ee tijaabooyinka dhiigga ee isbitaalka Angereds (Angereds Närsjukhus Provtagningscentral). Fadlan nala soo xidhiidh si laguu siiyo warqada dhiig qaadista ee aad la tagi doonto xarunta dhexe ee dhiig qaadista. Waxaa aad ka heli doontaa macluumaad ku saabsan sida aad noola soo xidhiidhi karto bogga ugu danbeeya buuggan yar.

*5 maalmood ka hor*

- **Brilique, Clopidogrel, Cloriocard, Efient, Gripid, Plavix ama Ticlid?** Waa in aad markaa ugu danbeyn 5 maalmood ka hor baadhitaanka aad la xidhiidho dhakhtarka daawayntaada qaabilsan si aad uga wada hadashaan sidii aad dawooyinka ku joojin lahayd baadhitaanka ka hor.

*1 maalin ka hor*

- **Eliquis, Lixiana, Pradaxa ama Xarelto?** Waa in aad markaa ugu danbeyn 1 maalin ka hor maalinta baadhitaanka aad hakiso qaadashada dawooyinkaas.

*Isla maalinta la sameynayo baadhitaanka*

- **Acetylsalisylsyra, Fragmin, Innohep, Klexane ama Trombyl?** Waa in aadan qaadan dawooyinkaas isla maalinta baadhitaanka la samaynayo.

## DAWOOYINKA BIRTA

Jooji inaad qaadatid dawooyinka birta 7 maalmood ka hor maalinta (waxay qusaysaa oo keliya baadhitaanka mindhicirka wayn ama mindhicirka wayn qaybtiisa hoose.)

## DAWADA INSULINTA

Haddii aad qabto cudurka macaanka isla markaana aad qaadato dawada insuliinta waxaa haboon in aad na soo wargeliso anaka. Dadka qaba cudurka macaanka waxaa sida caadiga ah lagu sameeyaa baadhitaanka maalintii gelinka hore.

## DAWOOYINKA KALE EE DHEERIGA AH

Dawooyinka kale ee dheeriga ah waxaa loo qaadan doonaa sidii caadiga ahayd ilaa iyo inta laga gaadhayo maalinta baadhitaanka. Laakiin waa inaad qaadatid ugu yaraan 2 saacadood ka hor wakhtiga la sameynayo baadhitaanka.

## DAWOOYIKA XANUUN YAREEYAHA/DAWOOYINKA DABCIYA JIDHKA IYO WADISTA BAABUURTA

Waxaa dhici karta in aad u baahato xanuun jabiye /yareeye iyo/ama daawo jidhka dabcisa marka baadhitaanka lagugu sameynayo. Baadhitaanka kaddib lama oggola inaad gaadiid kaxayso muddo 24 saacadood ah. Sidaa awgeed aad bey muhiim u tahay in aad wakhti fiican ka hor qorsheysato sidii aad gurigaaga ku tagi lahayd baadhitaanka ka dib.

## RIJEETO (RECEPT)

***Marka la smeynayo baadhitaanada koloskopi iyo sigmoideoskopi:*** Waxaad dawooyinka laguu qoray ka soo qaadan kartaa farmishayaha ugu danbeyn 1 asbuuc ka hor maalinta la sameynayo baadhitaanka.

Daawooyinku waa bilaash haddii aad kasoo qaadanaysid mid ka mid ah farmashiyaasha soo socda: Apoteksgruppen, Apotea, Apoteket AB, Kronans Apotek ama Lloyds.





Illustration: R. Landmér

Iyadoo la adeegsanayo tuubo kaamirad wadata ayaa baadhitaan lagu sameyn karaa hunguriga (1), kiishka caloosha (2) iyo qaybta sare ee mindhicirka dhuudhuuban (3).

# GASTROSKOPI

Gastroskopi waa baadhitaan lagu sameeyo hunguriga cuntadu marto, kiishka caloosha iyo mindhicirada yar-yar. Waxaa baadhitaanka lagu fuliyaa iyada oo la adeegsanayo qalab ama aalda lagu magacaabo gastroskop. Qalabkaas waxaa qofka baadhitaanka lagu sameynayo laga galiyaa afka isla markaana waxaa lagu sii dhaadhiciyaa caloosha.

*Macluumaad ku saabsan gastroskopi waxaa aad ka heli kartaa bogga 1177.*

Dhakhtarka sameynaya baadhitaanku wuxuu baadhaa xuubka ku dahaadhan mindhicirada, waxaadhici karta in uu qaado tijaabooyin iyo Waliba inuu sameeyaa daaweyn haddii loo baahdo.

Haddii aad rabto in aad ogaato macluumaad dheeri ah oo ku saabsan gastroskopi waxaa aad ka akhrin kartaa bogga internetka ee Vårdguiden 1177.

## *Waa maxey sababta loo sameeyo gastroskopi?*

Waxaa jira sababo badan oo kala duwan oo uu dhaktraka ku qaabilsan u sameeyo baadhitaanka gastroskopi-ga. Waxaa dhici karta in aad tusaale ahaan la il darantahay laab jeex, ay ku haysto dhibaato la xidhiidha xagga liqida, yalaalugo, matag, calool xanuun, miisaan dhicid, ama sababo kale.

Si baadhitaanku uu si fiican ugu dhaco waxaa aad u muhiim ah in kiishka calooshu uu gabi ahaanba faaruq yahay. Sidaa awgeed lama oggola inaad cunto raashin adag 6 saacadood baadhitaanka ka hor iyo in aan waxba la cabin 2 saacadood baadhitaanka ka hor.

Waxaa dhici  karta inaysan dawooyinku ku jirin- fadlan ka fiiri arimaha  khuseeya dawadaada bogga 3-aad.

## *Sidee loo sameeyaa baadhitaanka?*

Waxaa lagu siin doonaa kabaabiso afka ayaa lagaaga (buufin) doona baadhitaanka ka hor. Waxaa ay taasi suuerto galin doontaa in si sahlan loo fuliyo baadhitaanka

Baadhitaanku waxaa uu qaataa muddo dhowr daqiiqadood ah. Marka la sameynayo baadhitaanka waxaa kale oo suurogal noqon karta in dheecaan tijaabo ah laga soo qaado xubnaha xuubka. Haddii ay taasi dhacdo waa lagu wargalin doonaa.

Inta badan waxaa uu qofku ka baxaa isbitaalka marka uu baadhitaanku dhamaado. Laakiin lama ogolo in aad raashin cunto, aad cabto cabitaan ama aad qaadato wax daawo ah ugu horeyn qiyaastii muddo 1 saac ah baadhitaanka ka dib. Waxaa arintaas sabab u ah maadaama kabaabyadii lagu siiyey ay wali ku jirto jidhkaaga waxaa jirta halis in wixii aad cunto ama cabto marka aad liqeyso ay maraan meel

aan loogu talogalin oo qaldan.

### *Waxyeelooyinka iyo halista*

Waxaa dhici karta in baadhitaanka tuubada kaamirada wadata caloosha lagu soo baarayo (gastroskopi) kadib in aad mararka qaarkood si kale ka dareento cunaha. Arrinkaas isaga ah waa iska caadi wuuna kaa baab'i doonaa dhowr maalmood kadib. Waxyeelooyin yimaada  baadhitaanka gastroskopi-ga kadib waa mid aad dhif u ah.

Haddii aad baaritaanka kaddib isku aragtid xanuun shafka iyo caloosha kaaga qabanaya si aan kala go´ lahayn ama dhiig saxarada soo raaca, u tag qaabilaadda caafimaadka degdeg ah.

# SIGMOIDEOSKOPI

Sigmoideoskopi waa baadhitaan lagu sameeyo mindhicirka weyn qaybtiisa hoose.Waxaa baadhitaanka lagu sameeyaa iyada oo la adeegsanayo qalab la qal-qaloocin karo Qalabkan waxaa la galiyaa daloolka malawadka isla markaana waxaa hore loo sii galiyaa gudaha hore  ee mindhicirka weyn.

*Macluumaad ku saabsan sigmoideoskopi waxaa aad ka heli kartaa bogga 1177.*

Dhakhtarka sameynaya baadhitaanku wuxuu baadhaa xuubka ku dahaadhan mindhicirada, waxaadhici karta in uu qaado tijaabooyin iyo Waliba inuu sameeyaa daaweyn haddii loo baahdo.

Haddii aad u baahato macluumaad dheeri oo ku saabsan sigmoideoskopi waxaad ka akhrin kartaa bogga 1177.

### *Waa maxey sabata loo sameeyo baadhitaanka sigmoideoskopi-ga?*

Sababaha loo sameeyo baadhitaanka qaybta hoose ee mindhicirka wayn waxa ay noqon kartaa in tusaale ahaan saxarada dhiig la socdo, inuu isbeddel ku yimaado caadooyinka saxarada  ama tuhun laga qabo inay buro jirto.

### *Sidee loo sameeyaa baadhitaanka?*

Baaritaanka wuxuu caadiyan qaataa 20 daqiiqo.

***U diyaar galow adiga oo isticmaalaya KLYX:*** Baadhitaan ka hor waa in waxa kujira waaxda ama qaybta hoose ee mindhicirka weyn la faaruqiyo iyada oo la adeegsanayo daawooyinla lagu shubo/dhaqaajiyo caloosha. Aad bey muhiim u tahay muhiim in gabi ahaanba la faaruqiyo, mindhicirada, si dhakhtarka sameynaya

baadhitaanka ay ugu suuro gasho in uu arko sawiro si fiican u muuqad oo laga qaado xuubabka dahaadha mindhicirada.

Sidaa aawadeed waxaa loo baahanyahay in aad qaadato labo xabo oo KLYX (lagu shubo ama dhaqaajiyo caloosha) ka hor inta aanad iman baadhitaanka.

1. Hal xabo oo KLYX ah **habeenka ka horeeya** maalinta baadhitaanka
2. Hal xabo oo KLYX ah **isla aroornimada** maalinta lagugu sameyn doono baadhitaanka

Waxaa aad u cuni kartaa raashinka isla markaana u cabi kartaa cabitaanka sidii caadiga aheyd.

## *Waxyeelooyinka iyo halista*

Waxyeelooyinka yimaada marka la sameynayo baadhitaanka sigmoideoskop-ka waa kuwo aad dhif u ah.

Dadka qaarkiis waxaa ay dareemaan dibbiro, damqasho, dareen aan cadeyn oo caloosha laga dareemo ama dhiig saxarada soo raaca baadhitaanka kadib (tusaale ahaan markii qanjir meesha kasoo baxay laga soo jaro ama cad tijaabo ah laga soo gooyo). Arrinkaas isaga ah waa mid iska caadi ah wuuna kaa baab'i doonaa dhowr maalmood kadib.

In dhibaatooyin waawayn ka dhashaan baadhitaanka (malawadka oo aad u dhiiga ama dalool mindhicirka ah) waa dhif iyo naadir.  Haddii baadhitaanka kadib aad dareentid calool xanuun xun, qandho, ama aad u dhiig baxdid waa inaad mar walba tagtid qaabilaadda caafimaadka degdegga ah.

# KOLOSKOPI

Koloskopi waa baadhitaan lagu sameeyo gudaga mindhicirka weyn  iyada oo la adeegsanyo qalab sida raajada oo kala ah oo dhuuban isla markaana la qal-qaloocin karo, waxaa qalabkaas gudaha loo galinayaa mindhicirka weyn iyada oo laga soo galinayo daloolka walamadka. Qalabkaasi waxaa ay xuubka mindhicirka weyn ka soo qaadayaa sawiro. Iyada oo la adeegsanayo qalabkaas ayaa lagu soo qaadi karaa saami si sheybaar loogu sameeyo ama dawo loogu shubi karaa.

*Macluumaad ku saabsan koloskopi-ga waxaa aad ka heli kartaa bogga 1177.*

Haddii aad u baahato macluumaad dheeri oo ku saabsan koloskopi-ga waxaa aad ka akhrin kartaa bogga 1177.

## Waa maxey sabata loo sameeyo baadhitaanka koloskopi-ga?

Sababaha loo sameeyo baadhitaanka koloskopi-ga waxay tusaale ahaan noqon kartaa in la ogaado sababta keenta dhiig yari, caadooyinka saxarada oo isbeddel ku yimaado, baadhitaan waxa shubanka keenay lagu ogaanayo, qanjirro kasoo baxay ama haddii uu jiro tuhun ku saabsan buro.

## Sidee loo sameeyaa baadhitaanka?

Baadhitaanku wuxuu qiyaastii qaataa 30–45 daqiiqo

Macluumaad ku saabsan koloskopi-ga waxaa aad ka heli kartaa bogga 1177.

Hadaba si si fiican loogu arko gidaarada mindhicirka marka la sameynayo baadhitaanka kolosskopi-ga, waxaa lagu buufin doonaa gudaha mindhicirka hawo uu qalabku sii deynayo. Waxaa ay tani keentaa in mararka qaarkood in la dereemo dareemo aan fiicneyn sida tusaale ahaan xanuun, cadaadis, ducasho iyo dibiro.

Sida caadiga ah waad ka tagi kartaa isbitaalka baadhitaaan ka dib isla markaan sidii caadiga ayaad u cuni kartaa raashinka una cabi karta cabitaanka haddii aad rabto. Haddii lagu siiyey daawo ku dejisa ama dawooyin xanuun baabi'iye ah waxaad u baahan kartaa inaad xoogaa nala sii joogtid oo nasatid baadhitaanka kaddib.

Daawooyinka aad isticmaasho sidii caadiga ahayd ayaad u qaadan kartaa baadhitaanka kadib, haddii uusan dhakhtarkaagu talooyin kale ku siin.

## *Waxyeelooyinka iyo halista*

Waxyeelooyinka yimaada marka la sameynayo baadhitaanka koloskopi-ga, waa kuwo aad dhif u ah.

Dadka qaarkood waxay baadhitaanka kadib dareeemaan dibbiro, danqasho, dareen aan cadayn oo caloosha laga dareemo ama dhiig yar oo saxarada soo raaca (tusaale ahaan markii qanjir meesha kasoo baxay laga soo jaro ama cad tijaabo ah laga soo gooyo). Arrinkaas isaga ah waa mid iska caadi ah wuuna kaa baab'i doonaa dhowr maalmood kadib.

Waxyeelooyinka waawayn (dhiig badan oo malawadka ka yimaada ama mindhicirka oo dalooshama) waa dhif iyo naadir. Haddii aad dareento calool xanuun aad u daran, qandho ama aad si ba'an u dhiig baxdo baadhitaanka kadib waa inaad mar walba tagto qaybta xaaladda degdegga ah.

# PLENVU

Plenvu waa daawo caloosha dhaqaajisa oo aad u qaadanaysid si aad mindhicirka usoo nadiifisid baaritaanka ka hor. Waa inaad meel musqul leh joogtid markii aad Plenvu qaadatid kaddib maadaama daawadu mindhicirrada kasoo nadiifinayso waxa ku jira.

**Aad bey muhiim u tahay in midhicirkaagu uu gabi ahaanba nadiif yahay oo faaruq yahay markii baadhitaanka la samaynayo.** Markaas baadhitaanku wuxuu qaadanayaa wakhti gaaban dhibsashaduna way kaa yaraanaysaa. Haddii ay wax ku haraan waxaa dhici karta inay qariyaan isbeddelo jirro ah oo si fiican loo arki waayo. Markaas waxaad u baahan kartaa inaad baadhitaanka mar kale ku noqotid.

## *Talooyin*

Waxaa haboon in aad cabto cabitaan aad u badan oo saafi ah intii aad kari karto, ka hor iyo ka dib markaad qaadato Plenvu. Cabitaanka saafiga ah waxaa loola jeedaa sida tusaale ahaan biyaha, maraq aan buur-buur laheyn, cabitaan juus ah oo bilaa buur-buur ah, casiir, kafey iyo shaah bilaa caano ah. Cab  cabitaano diiran oo sonkor ama malab leh haddii aad dhaxamootid ama madax xanuun ku qabto. Waxaa kale oo fiican in la muud-muudsado kiniinka cunaha muddada aad cabeyso Plenvu.

! ***Aad bey muhiim u tahay in loo raaco tilmaamaha sida saxda ah ee ku xusan qodobada 1–4.***

## 1. HAL TODOBAAD KA HOR MAALINTA BAADHITAANKA

Ma cuni kartid mid ka mid ah raashinka hoos  ku qoran:

- Qamadiga galkiisa wata, midhaha iyo khudaarta sida tusaale ahaan qoondarka (linfrö), cunto ka sameysan qamadi iyo khudaar la isku darey (müsli), heed iyo Rooti ka sameysan buushiga qamadiga.
- Canabka, nooc khudaarta ka mid ah oo lagu magacaabo kiwi, liin dhanaan, midho guduudan/ casaan ah oo lagu magacaabo ”hallon”, ”passionsfrukt” iyo midh cas (lingon).
- Khudaar, midho iyo khudrada cagaaran oo wadata qolofkeeda iyo lafaheeda sida tusaale ahaan yaanyada, digirta cagaaran, seytuun, nooc qudaarta cagaaran ka mid ah oo ”sparris” la dhaho iyo galeyda.
- Looska iyo quinoa.

Wixii kale waxaad u cuni kartaa sidii caadiga aheyd illaa labo maalmood ka hor baadhitaanka. Haddii aad qaadato kiniinka birta ama feerada waa in aad joojisaa qadashadiisa ugu danbeyn 7 maalmood ka hor maalinta baadhitaanka. Haddii aad qaadatid daawada dhiigga khafiifisa, akhri qaybta” ”Dibu eeg daawooyinkaaga” ee ku taal bogga 3. Daawooyinka kale sidii caadiga ahayd baad u qaadan doontaa.

## 2. LABO MAALMOOD KA HOR MAALINTA BAADHITAANKA

Waxaad cuni kartaa oo kaliya raashin dareere ah sida tusaale ahaan maraq diyaarsan oo si fiican u riiqan, labeen, ciir iyo yoogadh.

## 3. LINTA KA HORRAYSA MAALINTA BAADHITAANKA

Wax cunto ah ma cuni kartid. waxaa laguu ogolyahay in aad cabto cabitaanada saafiga ah oo keliya, sida biyaha, maraq aan buurbuur lahayn, cabitaan juus aan buurbuur lahayn, kafey (qaxwe) iyo shaah aan sonkor lahayn.

### Saacada 19:00

- Ku qas **1** bac Plenvu ah weel 5 deciliter oo biyo qabow ah ku jiraan. U daa in daawada iyo biyaha qasan yaalaan 10 daqiiqo.
- 5 deciliter oo biyaha tuubada caadiga ah kula dar weel kale.
- Cab 1 deciliter oo daawada Plenvu iyo biyaha isku qasan ah 10 daqiiqaba mar. Waxaad ku dhex wadaa inaad 1 deciliter oo biyaha tuubada caadiga ah cabtid. Hadba xoogaa ka cantuug illaa aad ka wada cabtid.
- Qaado 2 kiniini ee kiniiniyaasha mindhicarrada ku burbura ee Toilax

## 4. MAALINTA LA SAMEYN DOONO BAADHITAANKA

Ka fiiri warqadda ballanta wakhtiga ballanta aad leedahay (gelinka hore ama gelinka dambe) oo raac tilmaamaha baadhitaanka loogu talo galey **gelinka hore** *ama* **gelinka danbe** sida hoos ku qoran. Waxaa laguu oggolyahay in aad cabto cabitaano saafi ah illaa iyo inta laga gaadhayo wakhtiga baadhitaanka.

### *Wakhtigee ayaa maalinta gudaheeda baadhitaanka maraysaa?*

| *Gelinka hore*<br>**Saacada 07:30–12:00** | *Gelinka danbe*<br>**Saacada 12:30–16:00** |
|---|---|
| *Hadddii lagu baadhayo gelinka hore sidaan samee maalinta baadhitaanka:* | *Hadddi lagu baadhayo galinka danbe sidaan samee maalinta baadhitaanka:* |
| **Saacada 05:00** | **Saacada 08:00** |
| Labada bacood ee **2A** iyo **2B** ee Plenvu ku wada qas 5 deciliter oo biyo qabow ah. Daawada iyo biyaha isku qasan ha yaaleen 10 daqiiqo kuna cab kuligood 1 1 saac gudihiis. Xoogaa xoogaa u cab, adigoo ku cabaya 5 deciliter oo biyo tuubo oo caadi ah. | Labada bacood ee **2A** iyo **2B** ee Plenvu ku wada qas 5 deciliter oo biyo qabow ah. Daawada iyo biyaha isku qasan ha yaaleen 10 daqiiqo kuna cab kuligood 1 saac gudihiis. Xoogaa xoogaa u cab, adigoo ku cabaya 5 deciliter biyo tuubo oo caadi ah. |
| Qaado labo kiniiniga afka laga qaato ee mindhicirrada ku burbura ee Toilax. | Qaado labo kiniiniga afka laga qaato ee mindhicirrada ku burbura ee Toilax. |
| **Saacada 07:00** | **Saacada 10:00** |
| Qaado kiniiinga dabada laga qaato ee Toilax. | Qaado kiniiinga dabada laga qaato ee Toilax. |

# VISTAPREP AMA LAXABON

Vistaprep iyo Laxabon waa daawooyin caloosha dhaqaajiya oo aad u qaadanaysid si aad mindhicirka usoo nadiifisid baaritaanka ka hor. Waa inaad meel musqul leh joogtid markii aad Vistaprep ama Laxabon qaadatid kaddib maadaama daawooyinku mindhicirrada kasoo nadiifinayaan waxa ku jira.

**Aad bey muhiim u tahay in midhicirkaagu uu gabi ahaanba nadiif yahay oo faaruq yahay markii baadhitaanka la samaynayo.** Markaas baadhitaanku wuxuu qaadanayaa wakhti gaaban dhibsashaduna way kaa yaraanaysaa. Haddii ay wax ku haraan waxaa dhici karta inay qariyaan isbeddelo jirro ah oo si fiican loo arki waayo. Markaas waxaad u baahan kartaa inaad baadhitaanka mar kale ku noqotid.

## *Tabo iyo talo*

Waxaa haboon in aad cabto cabitaan aad u badan oo saafi ah intii aad kari karto, ka hor iyo kadib markaad qaadato Vistaprep ama Laxabon. Cabitaanka saafiga ah waxaa loola jeedaa sida tusaale ahaan biyaha, maraq aan buur-buur laheyn, cabitaanka juuska oo aan buur-buur lahayn, casiir, kafey iyo shaah bilaa caano ah. Cab  cabitaano diiran oo sonkor ama malab leh haddii aad dhaxamootid ama madax xanuun ku qabto. Waxaa kale oo fiican in la muud-muudsado kiniinka cunaha muddada aad cabeyso Vistaprep ama Laxabon.

! ***Aad bey muhiim u tahay in loo raaco tilmaamaha sida ay ugu qoran yihiin qodobada 1–4.***

## 1. HAL TODOBAAD KA HOR MAALINTA BAADHITAANKA

Ma cuni kartid raashinka hoos ku qoran:

- Qamadiga qalkiisa wata, midhaha iyo khudaarta sida tusaale ahaan qoondarka (linfrö), cunto ka sameysan qamadi iyo khudaar la isku darey (müsli), heed iyo rooti ka sameysan buushiga qamadiga
- Canabka, nooc khudaarta ka mid ah oo lagu magacaabo kiwi, liin dhanaan, midho guduudan/ casaan ah oo lagu magacaabo hallon, passionsfrukt iyo midh cas
- Khudaar, midho iyo khudrada cagaaran oo wadata qolofkeeda iyo lafaheeda sida tusaale ahaan yaanyada, digir, digirta cagaaraan, seytuun, sparris-ka
- Looska iyo quinoa

Wixii intaas kasoo hara waxaad u cuni kartaa sidii caadiga aheyd, illaa labo maalmood ka hor baadhitaanka.

Haddii lagugu daaweeyo kiniiniga birta waa inaad joojisid inaad qaadatid ugu

danbayn 7 maalmood ka hor baadhitaankaaga. Haddii aad qaadatid daawo dhiigga khafiifisa, akhri qaybta ” Dibu eeg daawooyinkaaga” ee ku taal bogga 3. Daawooyinka kale si caadi ah u qaado.

## 2. LABO MAALMOOD KA HOR MAALINTA BAADHITAANKA

Waxaad cuni kartaa oo kaliya raashin dareere ah sida tusaale ahaan maraq si fiican u riiqan, labeen, ciir iyo yoogadh.

## 3. MAALINTA KA HOREYSA MAALINTA BAADHITAANKA

Wax cunto ah ma cuni kartid. Waxaad cabbi kartaa oo keliya cabitaan saafi ah. Ka fiiri warqadda ballanta wakhtiga maalinta gudaheeda (gelinka hore ama gelinka danbe) baaritaanka lagugu samayn doono oo raac tilmaamaha loogu talo galay gelinka hore ama gelinka danbe siday hoose ugu qoran yihiin.

Ka fiiri warqada wicitaanka ee laguu soo dierey wakhtiga lagugu sameynayo baadhitaanka (galika hore mise galinka danbe) markaa ka dibna raac tilmaamaha loogu talo galey **galinka hore** *ama* **galinka danbe** sida hoos ku xusan.

### *Wakhtigee ayaa maalinta gudaheeda baadhitaanka maraysaa?*

| ***Gelinka hore***<br>**Saacada 07:30–12:00** | ***Gelinka danbe***<br>**Saacada 12:30–16:00** |
|---|---|
| *Hadddi lagu baadhayo galinka hore waa in aad sameysaa sidan maalinta ka horeysa baadhitaanka:* | *Hadddi lagu baadhayo galinka danbe waa in aad sameysaa sidan maalinta ka horeysa baadhitaanka:* |
| **Saacada 08:00** | **Saacada 08:00** |
| Qaado 2 kiniinka Toilax oo laga qaato afka. | Qaado 2 kiniinka Toilax oo laga qaato afka. |
| **Saacada 14:00** | **Saacada 18:00** |
| Ku qas 2 bacood oo dawada Vistaprep/ Laxabon ah ah 2 litir oo biyo ah isla markaana waa in aad cabtaa muddo 1 saac gudihiis ah. | Ku qas 2 bacood oo dawada Vistaprep/ Laxabon ah ah 2 litir oo biyo ah isla markaana waa in aad cabtaa muddo 1 saac gudihiis ah. |
| **Saacada 20:00** | **Saacada 20:00** |
| Ku qas 1 bac oo dawada Vistaprep/ Laxabon ah ah 1 litir oo biyo ah isla markaana waa in aad cabtaa muddo 1 saac gudihiis ah. | Qaado 2 kiniinka Toilax oo laga qaato afka. |
| Qaado 2 kiniinka Toilax oo laga qaato afka. | |

## 4. MAALINTA LA SAMEYN DOONO BAADHITAANKA

Raac tilmaamaha baadhitaanka loogu talo galey **gelinka hore** *ama* **gelinka danbe** sida hoos ku qoran. Wax cunto ah ma cuni kartid. Waxaad cabbi kartaa cabitaano saafi ah keliya.

***Wakhtigee ayaa maalinta gudaheeda baadhitaanka maraysaa?***

| *Gelinka hore*<br>**Saacada 07:30–12:00** | *Gelinka danbe*<br>**Saacada 12:30–16:00** |
|---|---|
| *Haddii lagugu sameynayo baadhitaanka gelinka hore, samee sidan maalinta baadhitaanka:* | *Haddii lagugu sameynayo baadhitaanka galinka danbe, samee sidan maalinta baadhitaanka:* |
| **Ugu dabeyn saacada 06:00** | **Saacada 08:00** |
| Ku qas 1 bac oo dawada Vistaprep/ Laxabon ah 1 litir oo biyo ah isla markaana waa in aad cabtaa muddo 1 saac gudihiis ah. | Ku qas 2 bacood oo dawada Vistaprep/ Laxabon ah ah 2 litir oo biyo ah isla markaana waa in aad cabtaa muddo 1 saac gudihiis ah. |
| Qaado Toilax supoosto la galiyo dabada. | Qaado Toilax supoosto la galiyo dabada. |

Rev. 220629
VGR14753




Foto: Bert Leandersson

Haddii aad qabto su'aalo ah ama uu dhib kula soo derso waad nala soo xiriiri kartaa annaga joogna qaybta qaabilsan baadhitaanada gudaha xubnaha jirka (Endoskopimottagning). Waxaa aad na soo wici kartaa isniin-jimne inta u dhaxeysa saacadaha 07:00–16:00. Fadlan noo reeb fariin si aan dib kuugula soo xidhiidhno.

Wakhtiyada intaas dheeriga ka ah waxaa aad wixi kartaa 1177, ama booqo bogga internetka ee 1177.se.

*1177.se*

## ENDOSKOPIMOTTAGNING

Angereds närsjukhus
Halmtorget 1
424 65 Angered

www.angeredsnarsjukhus.se/endoskopimottagning

## LAMBARKA TELEFOONKA:

031 – 332 69 40




HITTA TILL OSS:

*Isbitaalka Angered närsjukhus wuxuu ka mid yahay Sjukhusen i väster*
*(Alingsås lasarett, Angereds närsjukhus, Frölunda specialistsjukhus/Högsbo närsjukhus, Kungälvs sjukhus)*